

Wargeyska Provider Hub | Diseembar 2025

Fariintan waxa loo soo diray dadka iska diiwaangeliyey Wargeyska Provider Hub. Haddii qof kuu soo gudbiyey iimaylkan, waxaanu kugu dhiirigelinaynaa inaad [si toos ah isu qorto](#).

Ku soo dhawoow Wargeyska Provider Hub, oo ay daabacdo kooxda [Provider Hub](#) ee Gobolka Minnesota! Aad baan ugu faraxsanahay inaad nala socoto.

Qaybtan wargeyska waxaad ka heli doontaa:

- [Kala horraynta Gobollada oo la Shaaciyey ee Bilawga Shatiga Daryeelka Carruurta ee Qoysaska gudaha Provider Hub](#)
- [Daryeel-bixiyeyaasha: Isdiiwaangeli Fursadaha Jawaab-celinta](#)
- [Talooyinka Provider Hub: Ka Hel Caawimaad Learning Libraries](#)
- [Talooyin ka timid Product Success team](#)
- [Isdiiwaangeli Kalfadhiga Macluumaadka Provider Hub ee Bisha Janaayo](#)
- [Soo-saarradii Ugu Dambaysay](#)
- [Ilo Cusub iyo Kuwo la Cusboonaysiiyey](#)

Kala Horraynta Gobollada ee Bilawga Shatiga Daryeelka Carruurta ee Qoysaska ee Provider Hub waa la Shaaciyey

Xilliga dayrta sanadkan, kooxda Provider Hub waxay ku dhawaaqday **kala horraynta gobollada** ee lagu bilaabi doono shatiga daryeelka carruurta ee qoysaska gudaha aaladda khadka tooska ah.

Waxaan adeegsanaynaa [gobollada horumarinta dhaqaalaha](#) ee ay maamusho Waaxda Horumarinta Shaqada iyo Dhaqaalaha (DEED) si aan isugu geyno degmooyinka (counties) bilawga tillaabo-tillaabada

ah ee gobolka oo dhan. Shatiga daryeelka carruurta ee qoysaska ee gudaha Provider Hub waxa lagu bilaabi doonaa marxalado, **iyadoo la raacayo kala horrayntan:**

- **Bilawga hore:** Becker, Cass, Crow Wing, Douglas, Hubbard, Morrison, Stevens, Todd iyo Wadena (Degmooyinkan waxay la shaqeeyaan [Sourcewell](#) si ay u bixiyaan adeegyada shatiga daryeelka carruurta ee qoysaska.)
- **Ka dib, Gobolka 4, West Central counties:** Clay, Grant, Otter Tail, Pope, Traverse iyo Wilkin
- **Intaa ka dib Gobolka 8, Southwest counties:** Cottonwood, Jackson, Lincoln, Lyon, Murray, Nobles, Pipestone, Redwood iyo Rock
- **Gobolka 2, Headwaters counties:** Beltrami, Clearwater, Lake of the Woods iyo Mahnommen
- **Gobolka 7E, East Central counties:** Chisago, Isanti, Kanabec, Mille Lacs iyo Pine
- **Gobolka 6E, Southwest Central counties:** Kandiyohi, McLeod, Meeker iyo Renville
- **Gobolka 1, Northwest counties:** Kittson, Marshall, Norman, Pennington, Polk, Red Lake, iyo Roseau
- **Gobolka 9, South Central counties:** Blue Earth, Brown, Faribault, Le Sueur, Martin, Nicollet, Sibley, Waseca iyo Watonwan
- **Gobolka 7W, Central counties:** Benton, Sherburne, Stearns iyo Wright
- **Gobolka 3, Arrowhead counties:** Aitkin, Carlton, Cook, Itasca, Koochiching, Lake iyo St. Louis
- **Gobolka 6W, Upper Minnesota Valley counties:** Big Stone, Chippewa, Lac qui Parle, Swift iyo Yellow Medicine
- **Gobolka 10, Southeast counties:** Dodge, Fillmore, Freeborn, Goodhue, Houston, Mower, Olmsted, Rice, Steele, Wabasha iyo Winona
- **Ugu dambayn, Gobolka 11, Twin Cities counties:** Anoka, Carver, Dakota, Hennepin, Ramsey, Scott iyo Washington

Si aad u eegto [cusboonaysiinta dhamaystiran ee dayrta 2025 \(PDF\)](#) — oo loo soo diray iimayl ahaan daryeel-bixiyeyaasha daryeelka carruurta ee qoysaska Nofeembar 10 — fadlan akhri warbixintaas si

aad u hesho faahfaahin dheeraad ah, oo ay ku jiraan xogta jadwalka hadda jira iyo sida daryeel-bixiyeyaashu ay u sii heli karaan macluumaadka uguna diyaargarooni karaan bilawga.

[Kor ugu noqo](#)

Daryeel-bixiyeyaasha: Isdiiwaangeli Fursadaha Jawaab-celinta

Ma tahay daryeel-bixiye haatan isticmaala ama mustaqbalka isticmaali doona Provider Hub? Ma rabtaa inaad nala wadaagto khibradaada? Buuxi [foomkan](#) si aad noogu sheegto.

Kooxda Provider Hub waxay si joogto ah u sameeyaan cilmi-baaris iyo tijaabooyin lala yeesho daryeel-bixiyeyaasha si ay u ogaadaan sida ugu wanaagsan ee aan u dhiseyno una horumarinayno aaladda onlaynka ah.

Markaad buuxiso [Feedback Opportunities Interest Form](#), magacaaga iyo macluumaadka lagugu soo xiriiri karo waxaa lagu daraa liis daryeel-bixiyeyaasha. Kooxda Provider Hub waxay liiskan u adeegsataa inay la xiriirto daryeel-bixiyeyaasha marka baahida cilmi-baarista iyo tijaabintu soo baxdo.

Foomka wuxuu ku waydiinayaa faahfaahin ku saabsan barnaamijkaaga iyo noocyada cilmi-baarista aad xiisayn karto (tusaale ahaan: sahanno, wareysiyo, aqoon-is-weydaarsiyo). Macluumaadkan wuxuu naga caawiyaa inaan ku waafajinno fursadaha jawaab-celinta daryeel-bixiyeyaasha ku habboon.

Waad ku mahadsan tahay waqtigaaga iyo khibradaa aad nala wadaagaysid!

[Kor ugu noqo](#)

Talooyinka Provider Hub: Ka Hel Caawimaad Learning Libraries

Hadafkeenna waa in dadka isticmaala Provider Hub ay helaan caawimada ay u baahan yihiin marka ay u baahan yihiin. Learning libraries waa ururinta ilo macluumaad oo loo habeeyey mawduucyo, kuwaas oo:

- Kuu keenaya dhammaan agabka la xiriira hal meel oo keliya
- Kuu soo bandhigaya tilmaamo tallaabo-tallaabo ah adiga — iyo dadka ku caawiya — ee aad mar kasta adeegsan karto
- Kaa caawinaya inaad kalsooni ku yeelato isticmaalka aaladda onlaynka ah si guul leh

Learning libraries hadda la heli karo

- [Basics](#) — ilo kaa caawinaya inaad ku bilaabato Provider Hub iyo inaad si guul leh u dhamaystirto hawlaha
- [Technology Resources](#) — iisaska tignoolajiyada aad u baahan tahay si aad u isticmaasho aaladda onlaynka ah, iyo ilo ku taageeraya helitaanka tignoolajiyadaas
- [User Access](#) — ilo kaa caawinaya in dadka isticmaala Provider Hub ay helaan gelitaanka ay u baahan yihiin si ay u taageeraan barnaamijkaaga gudaha aaladda

Shatiga/shahaadada — ilo loogu talagalay xarumaha daryeelka carruurta ee shatiga leh ama shahaadaysan si ay u fahmaan una maraan nidaamka shatiga/shahaadada ee Provider Hub:


- [Licensed Child Care Centers | Licensing](#)
- [Certified Child Care Centers | Certification](#)

Great Start Compensation Support Payment Program — ilo loogu talagalay inay kaa caawiyaan inaad buuxiso shuruudaha barnaamijka oo aad si hufan oo guul leh u hesho lacagaha:

- [Great Start Compensation | Application](#)
- [Great Start Compensation | Use of Funds Report](#)
- [Supplier ID Learning Library](#)

Halka laga heli karo

Marka laga soo tago isku xirka tooska ah ee kor ku xusan, waxaad Learning Libraries ka heli kartaa qaybta **Resources** ee bogga [Provider Hub](#).



Waxa kale oo aad ka baari kartaa markaad ku jirto [aaladda onlaynka ah](#) adiga oo adeegsanaya **Help & Resources**.

Ciddii loogu talagalay

- Daryeel-bixiyeyaasha cusub ee ku bilaabaya adeegsiga aaladda onlaynka ah
- Isticmaalayaasha hadda jira ee u baahan cusboonaysiin ama caawimaad degdeg ah
- Qof kasta oo isu diyaarinaya inuu mustaqbalka isticmaalo Provider Hub

La wadaag fikradahaaga

Ma isticmaashay learning libraries? Ma kuu ahaayeen kuwo waxtar leh? Maxay yihiin agabka aad u baahan tahay ee aadan weli ka helin? Noo soo sheeg providerhub@state.mn.us!

Tan iyo markii markii ugu horreysay lagu soo bandhigay learning libraries-ka [wargeyskii Agoosto \(PDF\)](#), kooxda Provider Hub waxay abuurday oo cusboonaysiisay dhowr ka mid ah uruurintan, waxayna sii waddaa inay dhisto kuwo kale iyadoo ku salaynaysa jawaab-celinta isticmaalayaasha.

[Kor ugu nogo](#)

Talooyinka Kooxda Product Success

Kooxda **Product Success** — oo ah kooxda khubarada maxalliga ah ee kaa taageerta inaad ku guulaysato isticmaalka Provider Hub — waxay wadaagaan laba talo oo ku salaysan wada sheekaysiyo dhowaan lala yeeshay isticmaalayaasha:

Ma joojinaysaa inaad noqoto Wakiilka La Oggolaaday ee barnaamijka?

Kahor inta uusan Wakiilka La Oggolaaday ka tegin barnaamijka, gudbi codsi isbeddel gudaha Provider Hub si aad u magacawdo Wakiilka La Oggolaaday ee beddelaya.

Maqaaladani waxay ku tusayaan sida loo sameeyo:

- [Certified Child Care Centers | Request to Change Your Authorized Agent](#)
- [Licensed Child Care Centers | Request to Change Your Authorized Agent](#)

Ma u baahan tahay inaad beddesho awoodda qolalka?

Gudbi codsi Room Usage si aad u codsato awood cusub oo ku saabsan mid ka mid ah qolalka barnaamijkaaga. Haddii aad aragto sanduuqyo casaan ah markaad sameynayso codsiga, fur qol kasta oo calaamadeysan oo dooro nooca adeegga.

Maqaalkani wuu ku caawin karaa: [Licensed Child Care Centers | Request a Room Usage Change](#).

La xiriir kooxda

Haddii aad u baahan tahay caawimaad la xiriira hawlahaan ama kuwa kale ee ku jira Provider Hub, wac **651-431-6075** ama [gudbi kiis](#) markaad ku jirto aaladda. Waxaan ka jawaabnaa cases Isniin ilaa Jimce inta u dhaxaysa 8 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo.

Haddii aan qof diyaar ahayn markaad wacdo, fadlan fariin reeb, oo ku dar inta badan macluumaadka soo socda:

- Magacaaga
- Magaca barnaamijkaaga
- Nambarkaaga telefoonka

- Su'aal(aha)ada iyo/ama codsi(yada)ada
- Nambarka shatiga ganacsiga (haddii ay suuragal tahay/khuseyso)

Annaga ma helno wax macluumaad ah dadka soo waca ee aan fariin ka tegin. Sidaa darteed, macluumaad kasta oo aad ku reebto fariinta wuxuu naga caawinayaa inaan si hufan oo degdeg ah dib kuula soo xiriiro.

Annaga ma helno wax macluumaad ah dadka soo waca ee aan fariin ka tegin. Sidaa darteed, macluumaad kasta oo aad ku reebto fariinta wuxuu naga caawinayaa inaan si hufan oo degdeg ah dib kuula soo xiriiro.

[Kor ugu nogo](#)

Isdiiwaangeli Kalfadhiga Macluumaadka Provider Hub ee Janaayo

Kooxda Provider Hub waxay martigelin doontaa kalfadhiga xiga ee onlaynka ah, oo furan dadweynaha, Talaadada, Jan. 20, laga bilaabo 6 ilaa 7 fiidnimo.

Qof kasta oo xiisaynaya inuu wax badan ka barto Provider Hub waa lagu soo dhawaynayaa. Mawduucyada laga hadli karo waxaa ka mid noqon kara horumarinadii ugu dambeeyey iyo kuwa soo socda ee Provider Hub, talooyin ku saabsan sida si wax ku ool ah loogu isticmaalo aaladda onlaynka ah, iyo ilo cusub ama la cusboonaysiiyey. Ka qaybgalayaasha waxaa loo oggolaanayaa inay su'aalo soo gudbiyaan inta lagu jiro kalfadhiga.

[Fadlan hore isu diiwaangeli](#). Haddii aad leedahay baahiyo taageero (tusaale ahaan turjubaan), fadlan isdiiwaangeli laba toddobaad ka hor dhacdada.

Ma awoodin inaad ka qayb gasho kalfadhigii Nofeembar? Dib u eeg [duubistii Kalfadhiga Macluumaadka Provider Hub](#) ee la qabtay Nov. 18, iyo sidoo kale warbixintii la qaybiyey: [Soomaali \(PDF\)](#) iyo [English \(PDF\)](#).

[Kor ugu nogo](#)

Soo-saaridii Ugu Dambeysay

Waxaan samaynay horumar ku saabsan Provider Hub Oktoobar 22 iyo Nofeembar 19. Cusboonaysiinada waxaa ka mid ahaa:

- Waxaa la beddelay midabada qaar ka mid ah qoraalka iyo qaybaha qurxinta aaladda si loo kordhiyo kala-duwanaanta midabka loona taageero helitaanka / akhris-fududeynta
- Waxaa lagu beddelay erayga “child care” (xannaanada carruurta) ereyga “social service” (adeegga bulshada) bogga hore ee Provider Hub iyo qaybo ka mid ah habka cusub ee codsiga, si loo tixgeliyo noocyada shati ee mustaqbalka lagu dari doono
- Waxaa la xaliyay arrin dhacaysay marka daryeel-bixiyeyaashu soo gudbiyaan koonto bangi oo ka bilaabmayso eber (0) — kaddib markii ay gudbiyaan diiwaangelin cusub oo Child Care Assistance Program (CCAP) ah ama codsi isbeddel

Eeg [October release notes](#) iyo [November release notes](#) si aad u aragto faahfaahinta cusboonaysiinadan iyo kuwo kale.

CUSUB — Dhammaan dadka isticmaala Provider Hub ee leh **Delegated Authority** ayaa loo soo diray November release notes (ma aha oo kaliya **Authorized Agents** ee xarumaha shatiga leh iyo **Center Operators** ee xarumaha shahaadaysan). Mustaqbalka, waxaan qorshaynaynaa inaan warbixinaha cusboonaysiinta u sii dirno kooxdan ballaaran ee isticmaalayaasha kuwaas oo si joogto ah ugu jira aaladda onlaynka ah.

[Kor ugu nogo](#)

Ilooyin Cusub iyo Kuwa la Cusboonaysiiyey

Marka lagu daro [learning libraries-ka la cusboonaysiiyey](#), **xarumaha daryeelka** carruurta ee shahaadaysan waxaa hadda u diyaar ah tilmaamo tallaabo-tallaabo ah oo ku saabsan habka codsiga: [Apply for a New Certification – Phase 1](#).



[Kor ugu noqo](#)

Ku Saabsan Provider Hub

Provider Hub waa aalad onlayn ah oo loogu talagalay bixiyeyaasha adeegyada bulshada si ay ugu codsadaan oo ay ugu maamulaan shatiyada, maalgelinta iyo ka qaybgalka barnaamijyada kale ee dawladda.

Kooxda Provider Hub waxay sii wadaan horumarinta aaladda onlaynka ah iyo dhisidda astaamo cusub. Markaan taas sameyno, bixiyeyaasha dheeraadka ah ayaa heli doona gelitaanka. Ka eeg bogga [Provider Hub](#) faahfaahinta ku saabsan helitaanka hadda jira.

[Kor ugu noqo](#)

Ku Saabsan Wargeyska Provider Hub

Wargeyskani waxa uu la wadaagaa macluumaad guud oo ku saabsan Provider Hub dadka hadda isticmaala iyo kuwa mustaqbalka isticmaali doona aaladda onlaynka ah, iyo sidoo kale cid kasta oo kale oo danaynaysa. Waxaan soo dirnaa wargeys cusub oo Provider Hub ah qiyaastii labadii biloodba mar. Ka hel qaybihii hore bogga [Provider Hub](#).

Ma nihin inaan wargeyskan ku beddelno macluumaadka si toos ah loogu diro kooxo gaar ah — sida digniinaha loogu diro dadka hadda isticmaala Provider Hub ama xogta lagu soo dhaweeyo dadka mustaqbalka isticmaali doona. Kuwan waxaan sii u soo diri doonaa si gooni ah.

Lawadaag wargeyskan dadka kale

Ma taqaan cid kale oo laga yaabo inay xiisaynayso helitaanka wararka ku saabsan Provider Hub? U sii iimaylkan oo ku dhiirigeli [inay si toos ah isugu qoraan wargeyska](#).

[Kor ugu nogo](#)